

# MASHRUUCA ROSE

## Sidee ayaan u wanaajin karnaa gaadiidka dadweynaha ee

Iyada oo loo marayo **Mashruuca Rose Lane**, Wasaaradda Gaadiidka ee Portland (Portland Bureau of Transportation (PBOT)) waxay sahmineysaa sidii basaska iyo tareenada looga weecin lahaa taraafikada, taasoo ka caawineysa dad badan oo reer Portland ah inay u gaaraan halka ay u baahan yihiin si dhakhso ah oo la isku halayn karo.

### Waxaan rabnaa inaan maqalno aragtidaada!

Bisha Diseembar, nala wadaag fikradahaaga ku saabsan:

- Xaaladaha aad kala kulantay gaadiidka dadweynaha
- Goobaha ay tahay inaan tixgelinno xilliga tijaabinta gaadiidka dadweynaha sida wadooyinka mudnaanta basaska



## KAQEYBGALKA

Kala hadal shaqaalaha PBOT, wax ka baro mashruuca, oo miisaan ku samee soo-jeedinta tijaabada ah

- **Talaadada, Dec. 3, 5:30-7:30 fiidnimo**, Mashruuca Rosewood (16126 SE Stark St.)
- **Sabti, Diseembar 7, 2- 4 galabnimo**, Xarunta Bulshada ee Maktabada North Portland ( 512 N Killingsworth St .)
- **Isniinta, Diseembar 9, 5:30 - 7:30 fiidnimo**, Dhismaha White Stag (70 NW Couch St.)

Si aad u codsatid adeegyada tarjumaadda, fadlan wac 503-823-6177 oo soo sheeg taariikhda iyo luqadda aad doorbidayso ugu yaraan laba maalmood ka hor maalinta furitaanka munaasabada ee aad rabto inaad

## XOG-URUURINTA QADKA AH

Goordhow soo baxaya! Waxaad awood u yeelan doontaa inaad bixiso ra'yi-celintaada ku saabsan soo-jeedinta tijaabada ah adiga oo isticmaalaya xog-aruurin qadka ah inta u dhexeysa Dec. 2-16.

### Wax badan ka ogoow:

[www.portlandoregon.gov/transportation/roselane](http://www.portlandoregon.gov/transportation/roselane)

Maamulaha Mashruuca: April Bertelsen

**PBOT**  
PORTLAND BUREAU OF TRANSPORTATION



Magaalada Portland waxay u hogaansan tahay dhamaan shuruucda takoorida, Xuquuqda Rayidka oo ay ku jiraan Xuquuqda Rayidka ee Faraqa VI iyo ADA Faraqa II. Si gacan looga geysto xaqiijinta in dadka oo dhan fursad siman u helaan kaqeybgalka barnaamijyada, adeegyada iyo waxqabadka, Magaalada Portland waxay si macquul ah wax uga beddeli doontaa siyaasadaha / habraacyada, waxayna dadka naafada ah u fidin doontaa kaalmooyin / adeegyo kaalmeeya. Wac 503-823-5185, TTY 503-823-6868 ama khadka taleefanka bilaashka ah ee loogu talagalay dadka naafada ah ee Oregon. 711 haddii aad hayso codsiyo noocaas ah, ama booqo <http://bit.ly/13EWaCg>

# MASHRUUCA ROSE

## Wanaajinta gaadiidka dadweynaha

Iyada oo loo marayo Mashruuca Rose Lane, PBOT waxay sahmineysaa sidii basaska iyo tareenada looga weecin lahaa taraafikada, taasoo ka caawineysa dad badan oo reer Portland ah inay u gaaraan halka ay u baahan yihiin si dhakhso ah oo la isku halayn karo.

Gudoomiyaha Eudaly ayaa fikridaan markii hore la wadaagay PBOT ee xagaagii 2019. PBOT waxay filaysaa inay Golaha Magaalada u soo bandhigto soo-jeedinta mashruuc si loo dhaqangeliyo Febraayo 2020.

### Ujeedooyinka Mashruuca:

- In la sameeyo **dhowr "Mashaariic oo Tijaabinta Rose Lane ah" iyadoo ahmiyada la siinaayo gadiidka** taas oo la dhaqangelin doono 2020 iyo 2021. Mashaariicdan waxaa la bilaabi doonaa iyadoo la adeegsanayo dhismooyin fudud / agab ku meel gaar ah sida xargo, calaamad, rinjiyeyn iyo warqadaha derbiyada lagu dhejiyo.
- In **"Himilada Shabakadeed ee Rose Lane" loo aqoonsado Shabakad Gaadiid oo Ballaaran**, taas oo la gaarsiin doono goobo laga dhisayo mashruucyo iyo barnaamijyo kale. Himilada waxaa ka mid noqon kara mashaariicda muddada dhow iyo mashaariicda muddada-dheer ee loo qorsheeyay muddo ka dib.
- In la sameeyo Muuqaalo lagu aqoonsado **"Rose Lane"** kuwaas oo lagu dhejinaayo Shabakada Rose Lane si loo kordhiyo nadiifnimada iyo kor u qaadista gadiidka wadada.
- **Dhaqangelinta hagaajinta adeegga TriMet** iyo gunnooyinka kale ee daraawalada iyada oo loo marayo heshiisyo iskaashi ah.

### Waa maxay himilada Shabakada Rose Lane?

Waa shabakad wadooyin gaadiideed oo ku kala baahsan Magaalada Portland kuwaas oo ah:

- **Kuwo degdeg badan.** Jidadka basaska iyo gawaarida ee leh mudnaanta si loo wanaajiyo xawaaraha, isku halaynta iyo awoodda taraafikada, oo ay ku jiraan qaybo ka mid ah dariiqyada aan xirneyn ee loogu talagalay gaadiidka iyo Qalabka Gawaarida ee Gaadiidka Dadweynaha Magaalada. Tani waxaa ka mid noqon kara Calaamadaha waddooyinka ee casaanka ah kuwaas oo ku calaamadaysan waddooyinka gaadiidka ee mudnaanta la siiyey.
- **Kuwo soo noqnoqda.** Waa shabakad ka kooban Khadad Adeeg oo Soo-noqnoqda 15-kii daqiiqaba mar, inta badan saacadaha jaamka. Khadadka qaarkood waxay noqon karaan kuwo soo noqnoqda 12 daqiiqo maalinta oo dhan ama si ka sii fiican haddii adeegyada mustaqbalka la kordhiyo.
- **Kuwo buuxa.** Khadadka khaas ahaan ama asal ahaan loogu talagalay gaadiidka waxay qaabilaan basaska / gawaarida oo inta badan yimaada oo qaada dad badan si ay u kordhiyaan faa'iidada.

